

# Waa maxay Isku Xirka Qoyska-Dugsiga (Family-School Compact)?

## Taageeridda Iskaashiga

## Talahi Community School

Heshiiska Qoyska-Dugsiga Title I ee Kasbashadu waa heshiis ay waalidiinta, ardayda iyo macalimiintu soo wada saaraan. Wuxuu sharaxaa sida waalidiinta iyo macalimiintu ay uga wada-shaqayn doonaan hubinta ardayda oo dhan inay helaan taageerada qof-calaa-qofka ah ee ay u baahan yihiin si ay u gaadhaan ugana saramaraan heerka waxbarashada fasalka.

Talahi waa dugsiga Title I Iskuulka oo Dhan ah. Hadafka barnaamij Title I Iskuulka oo Dhan ah waa hubinta in ardayda oo dhan, gaar ahaan ardayda liidata, muujiyaan aqoon iyo heerar sare oo kasbasho waxbarasho ah.

### Himilada Degmada 742

Oraahda Howgalkayagu waa abuurista jawi badbaado iyo daryeel iyo dhaqan kaasi oo aanu ugu diyaarino, ku hawlgalino, wax ku barno, ku xoojino, oo ku dhiirgalino dhammaan ardayda iyada oo la kaashanayo bulshada ku hareeraysan si aan ugu guulaysano bulshada maanta iyo tan berriba.

### Yoolasha/Ahdaafta Dugsiga

**Akhriska K:** Gu'ga 2021, boqolkiiba inta ardayda fasalka Kindergarten ee haysata ama ka saraysa bartilmaameedka fasalada ee Lexia ayaa wuxuu ka kordhi doonaa 45% (helitaanka qalabka heerka fasalka) dhammaadka Oktoobar oo uu gaari doonaa 95% (helitaanka qalabka heerka fasalka ama ka sarreeya heerka fasalka) dhammaadka Maajo.

**Akhriska Fasallada 1aad iyo 2aad:** Guga 2021, boqolkiiba inta ardayda fasalka 1aad iyo 2aad ee gaaraysa ama ka sarreysa heerka aqooneed ee qiimaynta STAR ayaa ka kici doonta 26% ee ah gaaritaanka heerka aasaasiga ah oo gaari doonta 46% oo ah gaaritaanka heer aqoon bartay.

**Akhriska Fasallada 1aad iyo 2aad:** Guga 2021, boqolkiiba inta ardayda fasalka 1aad iyo 2aad ee gaaraysa ama ka sarreysa heerka aqooneed ee qiimaynta STAR ayaa ka kici doonta 35% ee ah gaaritaanka heerka aasaasiga ah oo gaari doonta 50% oo ah gaaritaanka heer aqoon bartay.

### Hawlaha lagu Taageero Iskaashiga

**Shirka Dejinta Himilada/  
Yoolka**  
• Sebtember 8, 9 & 10

**Shirarka Waalidka  
Macallinka ee Ardaydu  
Hogaaminayso**  
3 - 7 p.m.  
• Noofembar 12 & 19  
• Febraayo 18 & 25

**Bikniga Qoyska ee Talahi**  
• TBD

**Maktabadaha Akhriska  
Guriga**  
Waxaa lagu qaybiyey shirarka Nofeembar iyada oo la socota xaashida xeeladaha akhriska.

**Xisaab ila Samee Isniinaha  
oo Kombiyuutarka La  
Adeegsanayo**  
3 - 4 p.m.  
• Noofembar 23  
• Diisambar 21  
• Janayo 25  
• Febraayo 22  
• Maarso 29  
• Abriil 26

### War Isgaadhsiinta Kusaabsan Barashada

Talahi waxa ka go'an gaadhsiinta si jooqto ah qoysaska loo gaarsiyo wixii kusaabsan barashada ilmahooga. Qaar kamid ah qaababka waalidiintu filan karaan inay ku helaanwar isgaadhsiinta waxa kamid ah:

- Guriga/iskuulka faylka guriga u qaadashada
- Wargeyska iskuulka ee billaha ah
- SeeSaw

**Su'aalaha?** Waalidiintu waxay la xidhiidhi karaan macallinka ilmahooga si ay u hubiyaan horumarka ardayga.

📞 320-370-7780

🌐 [www.isd742.org/talahi](http://www.isd742.org/talahi)

📍 1321 University Dr SE, St. Cloud

# Title I Isku Xirka Qoyska- Dugsiga ee Guul Gaaridda ee Diirad Saaridda Guusha Ardayda 2020-21



St. Cloud Area  
School District **742!**

Nicole Hanson, Maamule  
[nicole.hanson@isd742.org](mailto:nicole.hanson@isd742.org)  
320-370-7780

# Fasalka dhexdiisa

Dugsiyada Degmada 742 waxay kala shaqeyaan ardayda iyo qoysaska taageerista guusha ardayda ee xagga akhriska iyo xisaabta. Marka la joogo Talahi, qaar kamid ah isku-xidhayaasha muhiimka ah ee qoysaska waxa kamid ah:

- Khayraadka websaydka degmada iyo iskuulka si ay u taageeraan una dardargaliyaan waxbarashada ardayda. Waxaa laga heli karaa [www.isd742.org](http://www.isd742.org).
- Minnesota Reading Corps waxay bixiyaan taageero keli-keli ah (fool ka fool) ardayda Barbaarinta ilaa fasalka saddexaad.
- ADSIS (Hab Kale ee Gudbinta Adeega Waxbarashada Gaarka ah) waxay bixiyaan taageero dheeraad ah oo kooxo yar ah dhanka akhriska iyo xisaabta.
- Lexia - Core 5 reading waa barnaamijka la qabadiin ah oo ka taageera ardayda xirfadaha akhris-qorista.
- Moby Max wuxuu bixiyaa la qabadiinta barashada ee maadooyinka K-8.

# Guriga

Qaadashada layliga akhriska iyo xisaabta. Waa kuwan dhawr fikradood oo taas kaa caawinaya. Qoysasku waxa dhici karta inay hayaan fikrado kale si liiska loogu daro.

- Samee jadwal aad ku samaysaan in ardaygaagu uu soo galo Lexia maalin kasta guriga dhexdiis muddo 20 daqiiqo ah.
- Ilmahaaga la akhri maalin kasta. PAKRAT (Parents and Kids Reading A-Lot Together) oo ah barnaamijka waalidka iyo ilmaha oo isla akhriya wax badan waxay ay bixisaa buug cusub maalinkasta oo iskuul jiro si ay ardaydu guriga ugu qaataan oo ay 20 daqiiqo u akhriyaan. Ardaygaagu wuxuu sidoo kale ka soo dooran karaa buug uu akhriyo maktabadda akhrinta ee gurigooda.
- Ardaygaagu ha galo Moby Max oo ha ka shaqeyo aqoontiisa barshada xaqiiqooyinka.
- Ku ciyaar geemka erayada eray-bixinaha cusub erayadooda oo hel qaabab loogu isticmaalo erayadan wada-sheekaysiyada qoyska.
- Xog-ogaal ahaw adigoo raadinaya joornaalka fasalka ama dugsiga adiga oo bil kasta booqonayana boga internetka ee dugsiga si joogto ah.
- LA xiriir mid ka mid ah howlaha/waxqabadyada kombiyutarka dhexdiisa ah (virtual) ee websaydhka.

# Soojeedimaha loogu Talagalay Guusha

Ardaydu waxa dhici karta inay doonaan isku-dayga fikradaha so socda si ay xidhiid ugu sameeyaan ku barashada guriga iyo dugsiga:

- Ardaygaagu ha galo Lexia! Barnaamijka waxbarashada shaqsi ahaaneed ee loogu talagalay ardaydu waxay kordhisaa xirfadahooda akhris-qorista.
- Soo gal Seesaw si aad dib ugu eegto barashada ardaygaaga oo aad u aragto tusaalooyinka shaqadooda.
- Akhri, akhri, akhri! Samaysta jadwalka wax akhrinta ee guriga si aad u taageerto ku celcelinta barshada ardayda. Dhammaan ardayda Talahi waxaa la siin doonaa Maktabada Akhriska oo Guriga ah si ay fursad ugu helaan buugaag ay ku akhristaan guriga.
- Ka fiiri bogga Talahi Symboloo link-yada la heli karo ee meelaha barashada.

